## Su'aalaha Badanaa La Is Waydiiyo

**Waa maxay barnaamijka Better Futures?**
JBS USA and Pilgrim's waxay ka dhigayaan in Better Futures inuu noqdo barnaamij balaadhan oo kuuliyadeed oo bilaash ah oo ay heli karaan Maraykanka miyiyada degan iyo in aanu siino xubnaha kooxdeena iyo cida ay ka masuulka yihiin fursado ay ku doonan karaan himiladooda waxbarashada sare (dhigrii laba sano ah, shahaadada ganacsi) oo tacliintiisu bilaash tahay.

**Maxay Shirkadu u bixinaysaa Barnaamijka Better Futures?**
Barnaamijka Better Futures waxa uu waafaqsan yahay shaqdeena in aanu u abuurno fursado mustaqbal dhaama xubnaheena kooxda. Waxa aanu aaminsanahay in kuuliyada bulshada iyo dugsiyada farsamo ay siiyaan xubnaha kooxdeena iyo dadka ay ka masuulka yihiin fursado ay wax ku bartaan, koraan, oo ay ku hormayaan inta ay ka shaqaynayaan yoolashooda mustaqbalka.

**Imisa koorso ayaa barnaamijka ku jira?**
Barnaamijku waxa uu yahay ilaa 15 koorso seemistarkii iyo ilaa 30 koorso sanadkii, oo waxaa weeye barnaamijka 60 kiridh isku gayn (ama kharash u dhigta koorsooyinkata aan lahayn kiridhka kuuliyada).

**Maxaa la iga filanayaa in aan ka bixiyo jeebkayga?**
Barnaamijka Better Futures ardaydu waa inay bixiyaan ilaa $500 sanadkii kharashka guud iyo buugta. Shirkada ayaa bixinaysa dhamaan kharashaadka iyo kharashak guud si lo yareeyo kharashka ardayda. Marka laga tago kharashka guud iyo buugta, ardayda Barnaamijka Better Futures waxay yeelan kartaa kharash dheeraad ah oo meeluhu ku kala duwan yihiin iyo dugsiyadu (waxaa kamid ah kharashka koorsooyinkata, kharashka laabka, ruqada baarkinka, iwm.). Dugsiyada iskaashiga la leeyahay ayaa kaa caawin kara qiyaasta kharashka ee barnaamijkaaga dhigriiga, xadiga koorsooyinkata, iyo macluumaadka kaalmada dhaqaale.

**Waa maxay FAFSA?**
Waaxda Maraykanka ee Waxbarashadu waxay isticmaashaa foomka FAFSA (Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Federalka ee Ardayda) si ay u eegto ardayga u qalma kaalmada dhaqaale ee federalka ee baahida ku salaysan ee kuuliyada marka ay eegaan xaaladiisa dhaqaale. Kaalmadan waxaa kamid noqon kara deeqda federalka, gobolka iyo deegaanka iyo deeq waxbarasho.

**Maxaa la iiga baahan yahay inaan u buuxiyo FAFSA?**
Waxa aanu uga baahanay ardayda Barnaamijka Better Futures inay u buuxiyaan FAFSA si ay u yareeyaan kharashka waxbarashada ee arday kasta. Marka aad buuxiso FAFSA, waxa aad u qalmi kartaa kaalmada kaliya aan buuxinaynin kharashka waxbarashada iyo buugta, laakiin sidoo kale waxa aad gacan ka gaysan kartaa bixinta kharashka waxbarashada dadka kale (oo waxaa kamid ah teknooloojiyada, kharashaadka koorsooyinkata shakhsi ahaaneed, gaadiidka, agabka, iwm.). Marka la isku daro waxa aad ka hesho shirkada iyo wixii kaalmo dhaqaale ah, waxbarashadaada kuuliyada bulsho ama farsamo waxay noqon kartaa gebi ahaanba bilaash!

Hadii ay dhacdo in ardaygu aanu u qalmin FAFSA, fadlan la xidhiidh betterfutures@jbssa.com si aad ugala hadasho ikhtiyaarada aad uga faa'idaysan karto.

**Sidee Barnaamijka ula shaqeeyaa kaalmada dhaqaalaha ee kale?**

Barnaamijka Better Futures waxa u shaqeeyaa qaabka lacagta ugu danbaysa ee deeqda kaa caawinaysa inaad yarayso kharashkaaga kuuliyada si laguu siiyo waxbarasho bilaash ah. Shirka waxaa ka go'an inay arday kasta uga dhigto mid gaar ah, oo ay ka bixiso baaqiga kharashka ku hadhsan ee deeqda federalka, gobolka iyo deegaanka iyo deeqdaha waxbarahada ee la dalbaday.

**Imisa xubnood oo kooxda ah ama cid ay ka masuul tahay ayaa ka faa'idaysan karta gunada hal mar?**
Ka qayb galku waxa ku kooban tahay hal ruux oo laga masuul yahay ama xubin, markiiba. Xubnaha kooxda ee u qalma ee leh dadka badan ee ay ka masuulka tahay waxay ka faa'idaysan kartaa wax ka badan hal mar, laakiin barnaamijku waxaa ka faa'idaysan kara hal ruux oo laga masuul yahay markiiba.

**Sidee ayay noqonaysaa hadii xaaskayga/lamaanahaygu uu ka shaqeeyo Shirkada sidoo kale? Labadaayaduba maka faa'idaysan karnaa dheefta?**
Xubin kasta oo kooxda ah waxay ka faa'idaysan kartaa dheefta lafteedu ama hal ruux oo laga masuul yahay.

**Ma jirtaa koorsooyinka gaar ah oo aniga ama cida aan ka masuul ahay ay u baahan tahay inay qaadato?**
Maya. Xubnaha kooxda iyo cida laga masuul yahay waxay dooran kartaa daris kasta ama barnaamij dhigrii oo kasta oo ay doonto.

**Sidee ayay wax noqonayaan hadii ayna igu dhawayn Kuuliyada Bulsho ama Farsamo?**
Hadii aanay dugsiyo ku dhawayn xarunta ama xubnaha kooxda ayna awoodin inay ka faa'idaystaan gunada si shakhsi ahaaneed, xubinta kooxda waxaa loo sheegi doonaa Rio Salado College, ikhtiyaarada kuuliyada iskaashiga la leeyahay ee onleynka ah.

**Ma qaadan karaa koorsooyin saacadaha aan shaqaynayo?**
Xubnaha kooxda looma ogolaan doono inay fasax galaan wakhtiga ay shaeeyaan si ay u galaan koorsooyinka ama laylis uga shaqeeyaan. Wixii xubin kooxda ah ee doonaysa inay ka faa'idaysato Barnaamijka Better Futures waa inay qorsheysataa inay wax dhigato wakhti ka baxsan saacadaha shaqo.

**Sidee ayay noqonaysaa hadii gelin aan aniga ama cida aan ka masuul ahay ay dhigato? Cida kale oo aan ka masuul ahay maka faa'idaysan kartaa inta hadhsan ee gunooyinka sidoo kale?**
Maya. Gunada waxaa kaliya loogu talo geley hal xubin koox ama hal ruux oo uu ka masuul yahay markiiba, inta uu doonto ha dhigto ardaygu e.

**Sidee ayay wax noqonayaan hadii aan joojiyo shaqada Shirkada aniga oo seemistarka badhtankiisa ku jira?**
Hadii ay dhacdo in xubinta kooxdu ay joojiso shaqada Shirkada badhtamaha seemistarka, Ardayga u Qalma waxaa loo ogolaanayaa inuu dhamaystirto seemirtarka Barnaamijka, laakiin uma qalmayo wixii intaa ka danbeeya gunooyinka.

**Sidee ayay Shirkadu u dooratay inay ula shaqayso kuuliyada?**
Xubin kooxda Waaxda Shaqaalaha oo ka socota JBS USA and Pilgrim ayaa dooran doonta kuuliyada lala shaqeeyo oo xidhiidh hore ka dhaxeeyay xarumaha iyo kuuliyada, iyo inta ay u jirto xarumaheena si aanu u gudano waajibaadkeena barnaamijka Hometown Strong.

Waxaa naga go'an in aanu bixiso maalgelino wax ku ool ah oo samaayn rasmi ah u leh bulsheena jiilal soo socda. Markan oo kale, maalgelinteeda waxaa loo sameeyay mustaqbalka xubnaha kooxdeena iyo qoysaskooda, iyo sidoo kale kuuliyada aanu iskaashiga la leenahay.

**Mudo intee le'eg marka aan ka shaqeeyo Shirkada ayaan ka qayb geli karaa Barnaamijka Better Futures?**
Barnaamijka Better Futures waxa uu siiyaa kuuliyad bulsho ama dugsiga farsamo oo bilaash ah xubin kasta oo kooxda ah ama ilmaha ay ka masuulka yihiin xubinta kooxda ee:

- Xidhiidhka wanaagsan ka dhaxeeyo,
- U shaqaynayay Shirkada labada gelinba lixdii bilood ee lasoo dhaafay,
- Leh mushahar aan ka badnayn $130,000 sanadkii, iyo
- U shaqayn doona Shirkada mudada cida laga masuulka yahay ama xubinta kooxdu ay ku jirto kuuliyada

**Sidee ayay kharashka JBS USA and Pilgrim ay lacagta u siin doonaa kuuliyada iskaashiga la leeyahay?**
Kuuliyada iskaashiga la leeyahay waxay qaansheegta ku dalici doontaa Shirkada si toos ah kharashaadka seemistar kasta, oo Shirkadu waxay siin doontaa lacagta si toos ah kharashka waxbarashada la isku geeyay ee ardayda Better Futures ee ka faa'idaysanaya gunada kuuliyadaha iskaashiga la leeyahay.

**Mudo intee le'eg ayay qaadanaysaa Shirkadu inay bixiso qaansheegta?**
Badanaa, Shirkadu waxay ku bixisaa qaansheegta 30 maalmood gudaheed marka ay hesho.

**Ma u istimcaali karaa tan caruurta aan u ayayda/awowga u ahay?**
Hadii xubinta kooxda ay tahay cida kaliya ee ka masuulka ah ilmaha ay awowga/ayayda u tahay, ilmaha ayayda/awowga loo yahay waxaa loo arkaa cid laga masuul yahay oo u qalanta gunada. Xubnaha kooxda waxaa laga dalban doonaa inay keento cadayn inay tahay cida kaliya ee ka masuulka ah.

**Sidee ayay noqonaysaa hadii aan deganahay gobolka ka gedisan meesha ay ku taalo kuuliyada warshadaydu?**
Hadii ay dhacdo in xubinta kooxdu ay degan tahay gobolka ka duwan ka ay kuuliyada lala shaqeeyaa ku taalo, xubinta kooxda ama ilmaha laga masuulka yahay waxay ka dhigan kartaa ikhtiyaarka onleynka ah ee Rio Salado College.

**Su'aalo dheeraad ah?** Fadlan la xidhiidh – betterfutures@jbssa.com.

- - -

**Khayraadka**
Waxaa kugu waajib ah inaad buuxiso Arjiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardayga Federalka (FAFSA®) si aad ugu qalmi karto kaalmada dhaqaale ee kharashka aad ku bixinayso kuuliyada: fafsa.gov

Barnaamijka Better Futures waa u bilaa cashuur xubnaha kooxda, laakiin waxaa dhici karta in aanu bilaa cashuur u noqon caruurta laga masuulka yahay. Waxa aanu ku talinaynaa in aad kala tashato kaaliya diyaarinta cashuurta si aad u fahanto kharashka cashuurta ee cida laga masuulka yahay ee isticmaalaya gunada.